MILWAUKEE PUBLIC SCHOOLS

Diyaar - Diyaargarow - Ku Laabashada Fasalka

BARNAAMIJKA BAARITAANKA COVID-19

MPS waxay iskaashi la sameyneysaa Gingko Bioworks, Inc., si baaritaanka COVID-19 loogu fududeeyo ardayda iyo shaqaalaha ku soo laabanaayo dhismayaashayada si ay usii wataan waxbarashada qof ahaan loo soo xaadiro iyo shaqo. Barnaamijku wuxuu ka koobnaan doonaa baaritaan kooxeed oo xilli loo sameeynaayo, kaas oo qayb muhiim ah ka ah istiraatiijiyadda caafimaadka iyo nabadgelyada ee degmada. Barnaamijka baaritaanka wuxuu kobcin doonaa awoodda degmadu u leedahay inay bixiso jawi nabdoon oo waxbarashada qof ahaan loo soo xaadiro/shaqo ay ku siin karto ardayda iyo shaqaalaha.

concentric by GINKGO

SU'AAL	JAWAAB
Waa maxay baaritaanka wadajirka ah/ kooxeedka?	Baaritaan kooxeedka waa geedi socod kaas oo muunado laga soo qaaday shakhsiyaad badan la soo ururiyo loona baaro hal kooxo ahaan. Kani waa hab wax ku ool ah oo lagu baari karo tiro badan oo shakhsiyaad ah maadaama muunada baaritaanka laga soo qaadi karo dad ilaa 25 qof ah si loogu sameeyo hal baaritaan. Baaritaan kooxeedka ma bixiyo natiijo baaritaan oo u gooni ah qof walba oo ku jira kooxda; si kastaba ha noqotee, baaritaanka ayaa muujin kara jiritaanka COVID-19 ee kooxda muunada laga qaaday.
Waa maxay ujeeddada baaritaan kooxeedka?	Baaritaan kooxeedka wuxuu bixinayaa hab wax ku ool ah oo lagu ogaan karo COVID-19 ee shakhsiyaadka aan ka muuqan wax astaamo ah ama calaamado ah oo infekshan la xiriira. Dadaalkan lagu aqoonsado shakhsiyaadka aan astaamaha lahayn waa qayb ka mid ah habka waxqabadka degmada ee lagu yareeynayo faafitaanka COVID-19 iyo hubinta jawi nabdoon.
Yaa ka qayb geli doona baaritaanka?	Ardayda iyo shaqaalaha ku soo laabanaya waxbarashada qof ahaan looga soo xaadiro/ shaqada ayaa la baari doonaa.
Kaqeybgalka baaritaanka ma khasabbaa?	**Haa**, kaqeybgalka baaritaan kooxeedka waxaa looga baahanyahay dhamaan shaqaalaha iyo ardayda ku howlan waxbarashada qof ahaan loo soo xaadiro/shaqada.
Ma loo baahan yahay oggolaansho?	**Haa**. Oggolaansho qoraal ah ayaa la heli doonaa ka hor inta aan shaqsiga la baarin. Foomamka ogolaanshaha ayaa la siin doonaa qoysaska bilowga waxbarashada qof ahaan looga soo xaadiro. Foomamka ayaa la siin doonaa shaqaalaha markay ku soo laabtaan dhismayaasha. Foomka sidoo kale waxaa laga heli karaa websaydhka degmada.
Maxaa dhacaya haddii waalid ama xubin shaqaalaha ka mid ahi diido oggolaanshaha baaritaanka?	Haddii waalidku uusan oggolaan in ilmahoodu kaqaybqaato baaritaanka, canugga waxaa loo beddelayaa waxbarasho khadka tooska ah. Diidmada xubin ka mid ah shaqaalaha inuu ka qeybqaato baaritaanka waxaa loo tixgelin doonaa madax-adaygnimo.
Immisa jeer ayaa baaritaanka la qaadayaa?	Boqolkiiba toban ka mid ah ardayda iyo shaqaalaha goob kasta oo dugsi ah joogaan ayaa la baari doonaa toddobaad kasta.
Goorma ayuu baaritaanka bilaabanayaa?	Kooxda koowaad ee iskuuladu waxay bilaabi doonaan baaritaanka usbuuca Abriil 19, 2021, iyadoo iskuulada harayna ay bilaabi doonaan usbuuca Abriil 26.
Sidee muunadaha loo qaadi doonaa?	Muunadaha waxaa laga qaadayaa suufka sanka la geliyo. Shakhsiyaadka kaqeyb galaya baaritaanka ayaa iyaga laftooda iska qaadi doonaan muunada iyagoo suufka ku wareejinaya gudaha sanka ilaa afar jeer. Marka la dhammeeyo, shaqsigu wuxuu suufka ku ridayaa weel loogu talagalay kooxda/fasalka.
Maxaa ku dhacaya muunadaha?	Ka dib marka dhammaan suufafka laga soo qaaday kooxda lagu rido weelka ururinta, kalkaaliso caafimaad ama qof shaqaale ah oo loo qoondeeyey ayaa xiri doona weelka una diyaarin doona u rarista shaybaarka si loo baaro.

©2021 Milwaukee Public Schools

SU'AAL	JAWAAB
Shaybaarku ma yeelan doonaa macluumaadka shakhsiyeed ee lagu aqoonsan karo ka qaybgalaha?	**Maya**. Shaybaarka laguma keydin doono macluumaadka shaqsiyeed ee kaqeybgalaha. Weel kasta oo shaybaarka loo dirayo waxaa loo samayn doonaa koodh waxaana lagu lifaaqi doonaa oo keliya kooxda/fasalka. Dugsiga kaliya ayaa ogaan doona muunada shaqsiyaadka ee lagu soo daray weelka kooxda.
Sidee agabyada baaritaanka loogu keydin doonaa goobta dugsiga?	Dhammaan agabyada baaritaanka, macluumaadka, qalabyada, iyo foomamka oggolaanshaha waxaa la keydin doonaa meel aamin ah oo ammaan ah oo ku taala dhismaha waxaana sidaa samayn doona kalkaalisada ama qof shaqaale ah oo loo qoondeeyey.
Mudo intee le'eg ayay qaadan doontaa in la helo natiijooyinka?	Natiijooyinka waxaa lagu heli doonaa 24 ilaa 48 saacadood gudahood.
Shakhsiyaadka ku jira kooxda baaritaanka lagu sameeyey ma loo sheegi doonaa natiijooyinka baaritaanka?	Haddii natiijooyinka baaritaan kooxeedka ay noqdaan **kuwo taban**, **wax ogeysiis ah lama siin doono** shaqsiyaadka ku jira kooxda. Haddii natiijooyinka baaritaan kooxeedka ay noqdaan **kuwo togan**, **dhammaan shakhsiyaadka ku jira kooxda ayaa lagu wargalin doonaa** natiijada togan.
Maxaa dhacaya haddii natiijada baaritaan kooxeedka uu noqdo mid togan?	Shakhsiyaadka ku jira kooxda waxaa isla markiiba la ogeysiin doonaa natiijada baaritaanka ee togan waxaana lagu amri doonaa inay qaataan baaritaanka shaqsiyeed ee COVID-19 si loo ogaado haddii ay qabaan COVID-19. Dhammaan dadka ku jira kooxda waxaa la fari doonaa inaysan ku soo laaban goobta ilaa 14 maalmood. Waxbarashada kooxda fasalkaas waxaa loo wareejin doonaa waxbarashada khadka tooska ah ilaa muddo 14 maalmood ah.
Haddii ka-qeybqaate ku jira kooxda uu baaritaankiisa shakhsiyeed ee COVID-19 noqdo mid taban, ma ku soo laaban karaan goobta ka hor intaan 14-ka maalmood dhamaanin?	**Maya**. Dhammaan kaqeybgalayaasha kooxda baaritaankoodu noqday mid togan waxaa looga baahan doonaa inay ka maqnaadaan goobta ilaa 14 maalmood oo buuxa.

©2021 Milwaukee Public Schools